

Ogeysiiska Ogolaanshaha Dadban ee Waalidiinta

Minneapolis Public Schools Qorshaja lagu sahaminayo ee Ardayda.

2025 Sahanka Ardayda Minnesota

Minneapolis Public Schools wuxuu weydiisanayaa ardayda fasallada (5, 8, iyo 11) inay ka qaybgalaan (2025 Minnesota Student Survey) (MSS). Sharciga Federaalka ayaa naga raba inaan waalidiinta ku wargelino hawshan iskuulka. Saddexdii sano mar (MSS) ayaa sahanka noocan ah laga fulinayaa iskuulada ku yaala gobolkaaga.

Su'aalaha sahanka waxay ku saabsan yihiin mowduucyo badan oo la xiriira nolosha dhallinyarada. Sahanka wuxuu waydiinayaa sida dugsigu u socdo, qorshayaasha mustaqbalka, hawlaha ka baxsan dugsiga, caafimaadka jirka iyo maskaxda, xidhiirada, isticmaalka maandooriyaha, iyo waxyaabo kale oo badan. Ardayda dugsiga sare waxaa la weydiyey su'aalo ku saabsan dhaqanka galmada. Macluumaadkan faa'iidada leh oo ku saabsan fikirradooda iyo dhaqamadooda wuxuu caawiyaa bulshooyinka iyo iskuulada inay abuuraan barnaamijyo wax ku ool ah iyo inay bixiyaan adeegyo wanaagsan.

Sahanka waa mid qarsoodi ah. Si loo ilaaliyo in aan la aqoonsan shaqsiyaad ama qoysas, ardaydu ma bixinayaan magacyadooda, lambarrada aqoonsiga ardayga ama macluumaadkooda shaqsiga ah.

Ka-qaybgalka sahanku waa mid ikhtiyaari ah. Waxaad dooran kartaa inaad ilmahaaga ka reebto sahanka adiga oo buuxinaya oo soo celinaya foomka hoose. Ardaydu sidoo kale waxay iska dhaafi karaan qayb kasta ama sahanka oo dhan. Shaqaalaha ayaa siinaya xulashadaas.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan sahanka, fadlan la xidhiidh: Meghan Hickey, Executive Director of Student Support Services at meghan.hickey@mpls.k12.mn.us or ama maamulaha dugsiga.

Waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto nuqul (koobi) ka mid ah sahanka. [Heerka Fasalka Ardayga 5-6](#), [Heerka Fasalka Ardayga 7-8](#), [Heerka Fasalka Ardayga 9-12](#)

(Minnesota Student Survey) waxaa lagu qaban doonaa (School Name and Grades) (date).

Haddii aadan rabin in ilmahaagu uu ka qaybgalo (Minnesota Student Survey), fadlan soo celi foomkan: (name) inta aan la gaaring (date).

Magaca Ardayga: _____ Fasalka: _____

Iskuulka Ardayga: _____

Magaca Waalidka/ilaaliyaha (fadlan daabac): _____ Xidhiidhka ardayga: _____

Saxiixa Waalidka/ilaaliyaha: _____ Taariikh: _____